



Badbaadada Shaqada iyo Sharciga Caafimaadka

Waa sharciga! Cida loo shaqeeyaa waa inay wargelintan soo dhigtaa meel ay arkayaan shaqaalaha oo ay akhrin karaan.

(Cutub 49.17 Xeerka Washington ee Dib u Eegista Lagu Sameeyay [Revised Code of Washington, RCW])

Dhamaan shaqaaluhu waxey leeyihiin xuquuqda meel shaqo oo amaan ah caafimaadna leh.

Shaqaaluhu — Shaqaaleeyahaagu waa inuu kaa ilaaliyaa halisaha aad shaqada kala kulanto, ay kaagasii sheegaan oo tababaro ku siiyaan.

Waxaad leedahey xaqqa:

- Ogeysiinta shaqaaleyahaaga ama L&I (Shaqada iyo Shaqaalaha) ku saabsan halisaha meesha shaqada. Waxaad weydiin kartaa L&I iney magacaaga qariyaan.
- Codso Imtixaamista L&I ee meesha shaqada hadii aad aaminsantahey badbaado la'aan ama jiritaanka xaalado aan caafimaad aheyn. Adiga iyo matalaha shaqaalahaagu waxey ka qeyb qaadan karaan imtixaamista, iyadoon jirin waayis mushahar ama faaidooyin.
- Hel nuqulada diiwanada caafimaad, ay ku jiraan diiwaanada banbixista sunta iyo waxyaabaha dhibta leh ama xaaladaha.
- Cabasho u gudbi L&I 90 maalmood gudahood haddii aad aaminsan tahay in loo shaqeeyahaagu shaqada kaa eryay, ama kuu gaystay aargoosi ama takoor kaa dhan ah sabab la xariirta inaad gudbisay cabasho la xariirta badqabka, aad ka qaybgashay kormeerka ama talaabo kasta oo la xariirta badqabka.
- Rafcaanka tacadiga taariikhda sixitaanka hadii aad aaminsantahey wakhtiga la ogolaadey qoraalka masuul kama aha.

Sharcigu wuxuu u baahyahey inaad la socoto badbaadada iyo xeerarka caafimaadka ee khuseeya ficiladaada adiga iyo qabashada shaqada.

Shaqaleeyaasha — Waxaad leedihiin waajib sharci si aad u ilaaliso shaqaalaha shaqada ku jira.

Shaqaleeyaashu waa iney bixiyaan meel shaqo ka xor ah halisaha la aqoonsanyahey kuwaasoo sababi kara shaqaalaha halis daran ama dhimasho.

Ficilada ay tahey inaad qaado:

- La qabso dhamaan badbaadada meesha shaqada iyo xeerarka caafimaad ee khuseeya ganacsigaaga, ay ku jiraan sameynta iyo fulinta qorshaha kahortaga xaadiska qoran (sidoo kale la yidhi APP ama barnaamij badbaado).
- Soo dhaji ogeysiiskan si aad ula socodsiiiso shaqaalaha xuquuqahooda iyo masuuliyadooda.
- Kahor hawlgalada shaqada, tababar shaqaalaha sida looga hortago halisaha qarxa oo bixi qalabka ilaalinta shakhsiga loo baahyahey ee kharash la'aan.
- Ogow in shaqaale ka qeyb qaadan karo L&I badbaadada/caafimaadka imtixaamista, iyadoon jirin waayis mushahar ama faaidooyin. Imtixaamaha L&I wuxuu u hadli karaa kalsooni iyadoo leh tiro shaqaale ah.
- Haddii aad soo gudbisay cabasho la xariirta badqabka iyo/ama jebinta xeerarka caafimaadka, waa qasab inaad eedaymaha kusoo bandhigtaa goobta ama agta goobta xadgudubku ka dhacay ugu yaraan todobo maalmood oo kuwa shaqada ah, marka laga reebo maalmaha fasaxa asbuuca iyo fasaxyada guud. Waa inay meesha kusii dhaganaato ilaa dhammaan xad gudubyada laga saxaayo.

Eritaanka ama takoorista kasoo horjeeda shaqaale kasta ee buuxinta cabashada ama ka qeybqaadashada imtixaan, baadhis, ama furis ama xidhista shirka waa sharci darro.

Boodhkan waa ku diyaar si bilaasha L&I ee www.Lni.wa.gov/RequiredPosters.

Caawin bilaasha ka imanaysa Qeybta Badbaadada Shaqada iyo Caafimaadka (DOSH)

- Tababarka iyo kheyraadka dalacsiinta meelaha shaqo amaanka ah.
- Talobixinta isla-meesha si ay u caawiso shaqaaleeyaasha qeexista iyo hagaajinta halisaha, iyo maamulka halista si aad u hooseysiiso kharashaadka magdhowga shaqaalahaaga.



Shaqaleeyaashu waa inuu ka warbixiyaa dhamaan dhimashooyinka, dhakhtareynta bukaan-jiifka, fiixaha ama waayista il.

Warbixi dhimasho kasta shaqo-la xidhiidha ama dhakhtareynta bukaan-jiifka ee L&I Qeybta Badbaadada Shaqada iyo Caafimaadka (Division of Occupational Safety and Health, DOSH) inta lagu jiro 8 saacadood.

Warbixi fiix aan la-dhakhtarin oo shaqo uun-la xidhiidha ama waayis il ee DOSH inta lagu jiro 24 saacadood.

Dhimasho kasta shaqo-la xidhiidha, dhakhtareynta bukaan-jiifka, fiix ama waayis il, waa inaad ka warbixisaa xogtan soo socota ee DOSH:

- Qofka lagala xidhiidhayo shaqaaleyaha iyo telfoon nambor.
- Magaca ganacsiga.
- Cinwaanka iyo meesha halkaasoo dhacdooyin shaqo-la xidhiidha ka dhaceen.
- Taariikh iyo wakhtiga dhacdada.
- Tirada shaqaalaha iyo magacyadooda.
- Qeexis kooban ee waxa dhacay.

Halka loo warbixinayo:

- Xafiis L&I oo gudeed uun ama
- 1-800-423-7233, taabo 1 (diyaara 24/7)



Division of Occupational Safety and Health
www.Lni.wa.gov/go/F416-081-303 | 1-800-423-7233

Marka la codsado, taageerada luqadda ajnabiga ah iyo qaababka dadka naafada ah waa la heli karaa. Wac 1-800-547-8367. Isticmaalayaasha TDD, wac 711. L&I waa loo shaqeeyo fursad loo simanyahay